

Beesha Reer Xaaji Suleymaan oo Jawaab kulul ka bixisay hadal ka soo yeeray Dowladda KMG ee ku saabsanaa Qaraxii Ismiidaaminta ee ka dhacay Madaxtooyada

Kulan balaaran oo ay magaalada Muqdisho ku yeesheen Qeybaha kala duwan ee beesha reer Xaaji Suleymaan aan oo ka mid ah beelweynta Habargidir ayaa waxay uga hadleen, isla markaasna ay jawaab kulul uga bixiyeen hadal ka soo yeeray qaar ka mid ah saraakiisha dowladda KMG, Qaraxii ismiidaaminta ahaa ee maalintii Arbacada ka dhacay afaafka hore ee xarunta Madaxtooyada iyo Duqeyntii ay diyaaradaha Kenya ku laayeen caruur wadadhalatay oo hal qoys ka koobnaa.

Kulanka ayaa waxaa ka hadlay mas'uuliyiin ay ka mid ahaayeen Maxamuud Carab Caalin, C/laahi Macalin Xuseen Ducaale, Shire Jimcaale Faarax, Bashiir Maxamed Ereik iyo nin la sheegay inuu la socday Sheekh Cumar Maxamed Dhiblaawe ka hor intii uusan ku dhiman qaraxii ismiidaaminta ahaa, kaas oo magaciisa ku sheegay Axmed Maxamed Jimcaale, waxayna sheegeen mas'uuliyiintan in Cunar-weyne uusan wax lug ah ku laheyn qaraxa, isla markaasna lagu masabitay, warka ka soo yeeray Golaha wasiirada Xukuumadda KMG ee ah inu Cumarweyne fudeeye ka ahaa qaraxa uu yahay been aan sal iyo raad toona laheyn sida ay yiraahdeen.

“Waxaan ka soo horjeednaa isla markaasna aan cambaareyn u jeedinaynaa mas'uuliyiintii ka tirsaneyd dowladda KMG ee qaraxii ismiidaaminta ahaa dusha uga tuuray Sheekh Cumar weyne oo aan waxba ka ogeyn qaraxaasi kuna dhintay musiibadii dhacday, madaxda dowladda KMG waxaan ugu baaqeynaa inay raaligelin ka bixiyaan hadalka ka soo yeeray qaar ka mid ah saraakiisha dowladda KMG, sidoo kale hadalkii ka soo yeeray Col. C/laahi Caanood ee ahaa in Sheekh Cumar uu isagu qaraxa ka dambeeyayna uu yahay mid uu ka dhadhamayo qabiil” ayuu yiri Maxamuud Carab Caalin oo warbaahinta la hadlay.



Maxamuud-Carab-caalin

Sidoo kale Maxamuud Carab waxa uu sheegay in Sheekh Cumar-weyne uu u socday nin Adeerkiis ah oo ka shaqeeya xafiiska Ra'isul wasaaraha, goobta ay masiibadu ka dhacdayna uu ku sugayey Adeerkiis sidaasina meeshii uu ugu dhintay, loona bedelay in isagu uu qaraxu ka dambeeyay, arrinkaasi oo uu ku tilmaamay mid wax badan u dhimaya sharafka dowladda KMG, maadaama buu yiri qof aan wax dembi ah laheyn dembi dusha ka saartay.

“Saraakiisha dowladda KMG si ka fiirsi la'aan ah ayey dad aan dembi laheyn dembi dusha uga saaraan, waad la socotaan in qaraxii ka dhacay xarunta Hargaha iyo

Saamaha la yiri waxaa ka dambeeyay wiil arday ahaa oo Kenya ka yimid isaga oo aan ka dambeynin, kana mid ahaa dadkii musiibadaasi ku dhintay, markii dambana la

ogaadya inuusan wax raad ah ku laheyn, kan Sheekh Cumar-weynana waa sidaasi oo kale, marka mas'uuliyiinta iyo saraakiisha dowladda KMG waxaan u soo jeedinaynaa inay arrimaha noocaasi oo kale ka waantoobaan, raaligelinna ka bixiyaan hadalka gefka ah ee ay gesanayaan” ayuu yiri mar kale Maxamuud Carab Caalin

Sidoo kale waxay beesha Cabasho weyn ka muujiyeen Raiisul Wasaaraha Dowladda Federaalka Cabdiweli Maxamed Cali Gaas ka dib markii Balanqaadkii uu u sameeyey Qoyskii Diyaaradaha Kenya ku Xasuuqeen Magaaladda Jilib uusan waxba ka qaban waxayna Eheladii Qoyskii ay ka dhasheen ay sheegeen in ay qabsan doonaa Qareemo u dooda Qoyskaas oo qaar ka mid Shoogi ay ka qaadeen weli la jiifa

Waxaa dhawaan Xarunta loogga arrimiyo Dowladda Federaalka ee Villa Soomaaliya ka dhacay Qarax ismiidaamin oo la sheegey in uu fuliyey nin ku labisnaa Direyska Ciidamada oo aan la garaneyn halka uu ka soo galey afaafka hoore Xarunta Madaxtooyada iyadoo wararka qaar ay sheegayaan in goobta uu Qaraxa uu ka dhacay ay ahayd goob Maqaayad ah oo la sheegey in ay u dhow yihiin Guriga Gudoomiyaha Baarlamaanka sidoo waxaa u dhow Xafiisyo ay leeyihiin qaar ka mid Wasaaradaha Dowladda

W/D Amiin Yuusuf Khasaaro

E-Mail amiinkhasaaro@hotmail.co.uk

E-Mail amiinkhasaaroahoo.co.uk